# MAGACYADII LOO AQOON JIRAY DALKA SOOMAALIYA

ADM. Prof. Faarax Axmad Cumar

**MAQAALKII 4AAD :**

Waxaan ku soo qaadannay maqaalladii hore magacyadaan loo aqoon jiray dalkeenna ama qeyb ka mid ah waana sidan :-

1. Punt-land laga soo billaabo qarnigii 27-4(23Q) C.H. Asalka magacu waa Masar.

2. Phunt (Funt), Qarnigii (136) = 8 Qarni C.H. Asalku waa Yuhuud.

3. Kush (Dhulka dadkii madoobaa), qarniyadii 125 (8 Qarni) C.H. Asalku waa Masar, faahfaahintiisa ka eeg maqaalkii 1aad.

4. Ethiopia (Dhulkii dadka madow). Qarniyadii (5C.H-13 C.D). 18 Qarni, Asalka magacu waa Giriik.

5. Xabashi (Dhulka dadka madow ama isku dhafka ah). Qarniyadii (5CH13CD).18 Qarni, asalku waa Xijaas iyo Yamen, wuxuuna ku macno yahay 100% Ethiopia.

F.G: Magacaan Xabashi waxaa ka dhashay mid kale oo ah asagoo si xun loogu dhawaaqay waana ABISIINIYA oo ilaa hadda loo yaqaan dalka Ethiopia. Wixii faahfaahin ah ka aqriso maqaal L.2.

6. Macaafir (Mafartiis) oo ka yimid Yamen oo xeebaha Soomaaliya ee Badweynta Hindiya ku lahaa joogitaan, gaar ahaan mid ganacsi ah, waqtiyadii Dowladihii Yeman ka kacay ee MACIIN (1500 CH), SABA (1000 CH), Ximyar (5CH-6 CD).

7. AZAANIYA, wuxuu soo shaac baxay ka dib dhalashadii Nabi Ciise (CS), waxaana loo aqoon jiray xeebta Soomaaliya ee Bari iyo Koonfur ee Badweynta Hindiya; wuxuuna ku soo baxay khariidadii Bateyleymus (Plotemy) Qarnigii (3

CD). Magacaan waxaa u yaqiin Soomaaliya Dowladdii ROOMAANKA (Roman), gaar ahaan. Faahfaahintiisa ka fiiri maqaal L.3.(eeg khariidadiisa hoos ku qoran).

F.G: waxaa aqoonyahanno badani qabaan in magacaan uu ka yimid CAZAAN oo ahayd saldanad Yaman ah, Samenkii Dowladdii Ximar, Roomaankuna u aqriyeen AZAAN. eeg maqaal L.3 Magacyada maqaalkaan afaraad aan ku soo qaadaneyno waxaa ka mid ah: ZINJ IYO BARBAR.

8. Zinj (ama zinji), taariikhdiisu waxeey u noqoneysaa inta aan ognahay qarnigii 3aad ee ciise dabadii C.B, warkaan waxaa lagu qoray naqshad – dhagax oo sheegaysa in IIRAAN ay la ganacsan jirtay Boqorka Afric Zinji oo lagu qiyaasay in fadhigiisu ahaa jaziirada xaafuun 297dii. kalmada Zinji waa af IIRAAN, waxeeyna macna qabtaa MIRIIRKA BIRTA (La macna ah MADOW, ama dadkii madoobaa), sidii kalmadaha kale: Ethiopia , Xabashi iyo BARBAR oon soo xusi doono kalmadaha Zinji, waxeey ku qoreeyo khariidadii plotemy qarnigii 3aad ee ciiso dabadii.

Maadaama qarniyadii hore ay ku tartamayeen somaaliya magacyo badan aan qaarkood soo xusnay oo dhammantood ama intooda badani ay tilmaamayeen MEDEB MADOW, qaar ka mid ah wey go’een oo waa la hilmaamayey qaar kalene waxay soo gaareen qarniyadii dhexe sida: xabashi (ethopia) zinji iyo barbar aan ka hadli doono dhawaan.

Aan dhageeysano Yaaquut alxamawi (G.1228 C.D), waxuu yiri:

1. Reer seylac waa barbar waa kuwa madmadoow oo deegaan ahaan u dhaxeeya dhulka xabashida iyo kan zinjiga(2)

2. Berbera waa dhul u dhaxeeya kan xabashida, kan zinjiga iyo kan yaman, xeebta badda yaman (G.cadmeed) iyo badda zinji (badweynta hindiya)(3).

Halkaan waxaad ka garan kartaa in magacyadii ay kala yeelanayaan deegaano, halkii barigii hore ay wada tilmaamayeen deegaanka dadka MADOW.

Hada dalka Xabashi waxuu ku saloobay Buuralaw AMXAARADA, halka barbar ay ku salowday xeebta gacanka cadmeed, zinjina uu noqday xeebta badweeynta hindiya.

3. Muqadisho, Yaaquut ayaa warka watee, waa magaaalo xuduuda dhulka zinji dadkeeduna waa barbar aan ehayn barbarka woqooyiga AFRIKA, waana kuwa muuqaal ahaan u dhaxeeya xabashi iyo zinji.

4. Waxuu ka yari Yaaquut MARKA: waxay ku taal dhulka zinj, laakiin dadkeedu waa reer BARBAR. Halkaan waxaad ka arkeeysaa in reer barbar ay koonfur u sii riixayaan reer Zinji; waxayna taariikh ahaan muujineysa hayaankii soomaalida ee xag koofur.

5. Ibnu Batuuta oo Muqdisho booqday, kuna sugnaa 3 (saddex) cisho, sanadkii 1331 C.D, waa ka dib geeridii Yaaquut, waxuu yiri; suldaanka Muqdisho waxuu ahaa BARBAR, afkaan ayuuna ku hadlaayey , waxuuna yaqiin afka carabiga.

9. BARBAR, magacaan waxuu isna ku soo arooray khariidadii plotemy ee Q 3aad CD, asagoo ku qornaa dhinaaca zinji oo xigta xaga xeebta (fiiri khariidada), waana magac la socday kan zinji, waxaayna u eg tahay in magaca BARBAR uu muujinaayey gobollada soomaalilanda, kan zinjiguna uu muujinaayay gobolka bari, kuna soo fiday xeebta badweyn ta hindiya, hase yeeshee magaca barbar ayaa u muuqda mid ku fiday dhulka gobolada dhexe iyo ka sii koofur, asagoo mar kasta u riixayey Zinji xagga koonfur, si kale hadii aan u iraahdo; REER BARBAR waxay koonfur u riixeen reer Zinji amaba iska dheh Soomaalidu waxeey koonfur u riixeen jareerta (BANTU).

Sidaas owgeed waxii ka danbeeyay qarnigii 12aad magaca zinji waxuu ka baxay dalkii soomaaliya, waxaana ku wada haray 2da magac ee xabashi iyo barbar ilaa uu ka soo daahiro magaca soomaaliya dhamaadkii qarnigii 14aad, oo meesha ka wada saaray magacyadii ka horeeyay, waana mowduuca maqaalkaan 5aad ee 01/01/2016ka.

INSHALLAH.





*Fig. 58. East Africa according to Ptolemy*

# Maraajic (Reference):

(1) Nasiibdarro waan hilmaamay kitaabkii iyo qorihi

(2) Yanput: mucjam Al-buldaani, maadat:seylac

(3) Isaga maaddada Barbara

# TAARIIKHADA C. BADDA SOOMAALIYEEED

# MAQAALKII 4AA

ADM. Prof. Faarax Axmad Cumar


Waxaan joognaa horraantii 1975kii, C.badduna wuxuu sugayaa maraakiib cusub. Sidaa aan hore u soo qornay C. baddu waxaa kale uu lahaa saddex saldhig (Barbera, Muqdisho iyo Kismaayo) oo kala joogaan 6 markab oo ah xeeb ilaaliyayaal, 4 markab oo torbeedo – xambaare, jirkoodu yahay loox, 3 Urur Dillaaxin iyo 13 bar ilaalo oo ku teedsan xeebta min Seylac ilaa Raas kambooni, intaa waxaa la jira hal dugsi farsamo oo Xamar ku yaal iyo hal dugsi oo gaadiidka laga soo saaro ( Baraawe ), iyo Taliskii C. Badda oo ku yaallay Muqdisho.

Dhex-bartankii 1975kii waxaa soo noqday askartii (Badmaaxiintii) iyo Saraakiishii loo soo tababaraayey maraakiibta casriga ahayd oo xambaarta Sawaariikhda (Gantaalaha ) Bad-Bad iyo Bad- Dhul iyo madaafiic ah 4x30mm (4 dhuun oo30 mm ah) oo Daqiiqadii tuuraaya 4 x2000= 8000 xabbadood oo loogu talagaley ka Difaacidda markabka Dayuuradaha cadowga. Bilo yar ka dib waxaa soo gaaray (Dekedda) Berbera oo saldhig rasmi ah u noqtay maraakiibtaan afarta ah oo kala ah laba gantaal xambaare iyo Torbeed xambaare . Dhamaadkii 1975kii waxaa yimid 4 dejiye oo yar yar oo la kala geeyey Xamar iyo Kismaayo.




N. 343, *motosilurante classe « Shershen »* (pag. 566) (Tass, 1977

**TORBEDO TUURE**



Classe « OSA II », *motomissilistica* (pag. 566)

(g.c. JLC, 1979)

**GANTAAL XAMBAARE**

Waxaan xasuustaa taliyayaashii iyo injineeradii maraakiibta Gantaal-xambaarayaasha, waxayna kala ahaayeen:

1. G/LE Mowliid Xasan  Faarax ( C.M. Salax), Taliye

2. G/S Ahmed Xaaji Cumar ( C. Saleemaan ), Taliye

3. Dh. Nuur Taqsiin ( H/gidir), Ingineer ( oo hadda ah G/S Taliye xig.C.Badda)

4. Maxamed Nuur Muxamed (Gorgaate-Hawiye), Ingineer Taliye Saldhig.



AXMED XAAJI CUMAR



NUUR TAQSIIN



MAXAMED NUUR MAXAMED

Runtii maraakiibtaan aad ayey casri u ahaayeen, waxayna u diyaarsanaayeen qaab weerar, sidoo kale Dejiyaashu waxay ka qaadayeen Cutub (koox =30 qof) oo ah dallaaxiinta  (komadandooska) Badda Saldhiga waxayna geynaayeen Saldhig kale ama xeebtii la doono, sidoo kale waxay qaadayeen taakuleynta:  sida: raashin, Hub, Rasaas, Daawo …IWM.

Waxaan marna la hilmaami Karin rugtii farsamada ee Berbera oo runtii ahayd warshad lagu xanaaneeyo, misna lagu diyaariyo gantaaladda inta aan la saarin markabka  (4 xabbo ood moodid dayuurado yar yar ee markab kasta); sidoo kale kuwa torbeedyada ah. Rugtani waxay muhiim u ahayd  xoojinta C.Badda iyo awoodda X.D.S Soomaaliya.

Waa tii reer galbeedku ay ku sheeegi jireen in Barbera ay tahay Saldhig Ruush. Runtii anaga ayaa iska lahayn rugtaan, laakiin waxayahayd meel halis ku ah cadowga, reyreyna u ah shacabka Soomaaliyeed.


Waxaa loo magacaabay taliyihii 1aad: G/le C/laahi Cali Nuur (Digil), kii 2aadna ee rugtaan 2x/le (hadda G/sare) Inj. Cabdi Warsame Cismaan ( xawaadle) oo hadda ah ku xigeenka AB/Ha C.Badda iyo Madaxa Howlgelinta Ciidanka.

Sanadkii 1976kii waxaa dalka soo gaaray markab ah dejiye (oo qaadi kara Urur, 4 Tank iyo 6madfac, kana dejin kara xeebaha aan Dekedaha laheyn, ha ahaato xeebata dalka ama tan cadowga kolba sidii loo qorsheeyey. Markabkaan waxaa la geeyey Saldhigga Kismaayo.



**CABDI WARSAME**

**DEJIYE DHEXE**




N. 520, *nave da sbarco classe « Polnocny V »* (pag. 567) (A.N., 1980)

**C.BADDA IYO DAGAALKII 77**

C.Baddu siyaabo kala duwan ayuu uga qeyb galay dagaalkaan, xag taakuleyn oo xooggeeda uu lahaa markabka Dejiyaha oo isaga gooshaayey Kismaayo-Muqdisho–Berbera; Saraakiil uga qeybgashay C.dhul ahaan.

Laakiin wacdaraha weyn waxaa dhigay 2 (labada) markab oo gantaala-xambaarayaasha ahaa. Subixii 22/7/1977, qorraxdu inta aysan soo bixin ayey maraakiibtu ka furteen Dekedda Barbera ayagoo duullaan ugu socda Dekedda Casaba oo Berbera u jirta 470km; Waxayna ka talaabeen ciriiriga Baab-Al-mandab 16:00 (4tii galabnimo ); Waxay la dheceen Sawaariikh Dekeddda Casab Saacaddu markay ahayd 17:30 (Nus saac ka hor gabal dhaca), ayagoo dhib weyn u geystay Dekaddaas oo aheyd tan wax ay uga soo degi jireen Ethiopia. Nasiib darro waxaa xumaaday xiriirkii Soomaaliya ay la laheyd M.Soofiyeet, taasoo keentay in dalka laga eryo khubaradii Ruushka oo dhowr kun ahayd 13/11/1977kii, halkaas ayaa C.X.D.S. (Dhul, Cir, Difaac cir iyo C.Badda) uu uga xirmay Albaabkii Hubka iyo Tababarrada Ciidaanka. C. Badda wax hub ah ma helin oo dheeeraad ah ilaa laga soo gaaro Burburkii Dowladdii dhexe ee Soomaaliya 26/1/1991kii.




**Midig Safka hore : Qoraha (L.1) Xeyd (L.2) Taliye M.Geele (L.3)Ab/le Khalif (L-5) XALANE (L-4), Axmad Ismaaciil (L-6) & Axmad Xaaji Gacal (L-7)**

**Mid. Safka dambe: Macawisle, Saciid Marino iyo sarakil kale**